



Waa maxay Early Achievers?

Early Achievers waa qaab-dhismeed lagu horumarinaayo tayada daryeelka hore ee Gobolka Washington. Waxay siisaa xirfadlayaasha daryeelka carruurta ee kaqaybgalaya inay helaan hagitaan, kobcin xirfadeed iyo qaabab la taaban karo oo ay ku muujiyaan inay kaa go'an tahay inay siiyaan daryeel iyo waxbarasho tayo leh carruurta yaryar.

Waa maxay Booqashada Qiimaynta Goobta Shaqadu?

Barnaamijyada xannaanada carruurta iyo waxbarashada hore ee ka qaybgala Early Achievers waxay ka helaan booqashooyin qiimaynta goobta shaqada ah koox xog ururin oo ka socota Jaamacadda Washington (UW). Ujeedada booqashada qiimayntu waa in la eego iyo in la helo warbixinta ku saabsan barnaamijka si loo caddeeyo tayada barnaamijka loona bixiyo darajaynta Early Achievers. Darajayntan waxaa loo isticmaali doonaa wajiga xiga ee Early Achievers kaas oo diiradda saari doona dejinta hadafyada si loo sii wado horumarinta tayada daryeelka la siinayo ilmahaaga.

Maxaa Booqashada Qiimaynta Goobta Shaqada?

- Dadka xogta ururinaya ee UW waxay ku qaataan fasalka maalin, iyadoo ku dadaalaya inayna waxba ka khalkhalin jadwalkii maalinlaha ee carruurta.
- Xog ururiyayaashu waxay wax ugu kuurgali doonaan iyaga oo adeegsanaya agabka soo socda:
 - Qiyaasta Darajaynta Bey'adda (ERS): waxay qiimaysaa agabka ay heli karaan carruurta iyo siday carruurta iyo macallimiintu ugu shaqeeyaan agabkan.
 - Nidaamka Dhibic-siinta Qiimaynta Fasalka(CLASS): waxay eegi doontaa isdhexgalka macallimiinta iyo carruurta iyo siduu isdhexgalkani ula xidhiidho korriinta iyo barashada carruurta.
- Xog ururiyayaashu waxay naqdin doonaan faylasha barnaamijka daryeelka ilmaha lagu aqoonsaday si loo muujiyo sida barnaamijku u buuxinayo heerarka tayada oo uu u muujinayo adeegyada la bixiyo.

Inta lagu jiro nidaamka, xog ururiyayaashu:

- Waraaqahooda booqashada wax magacyo carruurta ah kuma isticmaalayaan.
- Warbixinta waxay soo arkeen kuma isticmaalayaan macluumaadka carruurta haybtooda sheegaya.
- Eegi maayaan wax fayl ilmo ah iyada oo aan helin oggolaanshaha saxeehan ee waalidka/koriyaha.
- Wax waraaqo ah kala bixi maayaan xarunta.

Waa maxay waraysiyada waalidku sidoo kale sideed uga kaalmayn kartaa?

Nidaamka qiimaynta waxaa kamid ah, inay waalidiintu iskood uga qaybgali karaan waraysi taleefanka ah oo ay siinayaan xog ururiyayaasha ama ay la wadaagayaan macluumaad iyaga oo buuxinaya xog ururinta onlaynka ah. Inta uu socda waraysigu waalidiinta waxaa wax laga waydiin doonaa taageerada iyo adeegyada barnaamijkooda siiyo iyaga iyo ilmahooda. Waxaad ikhtiyaarkaa ugaga qaybgali kartaa adiga oo buuxinaya qaybta waraysiga ee foomka oggolaanshaha waalidka.